AWOODSIIN 2
– Hagista xagga bulshada –

Halkaan waxaan aniga ku siinayaa,
Magaca oo buuxa:
Taariikhda dhalashada:
V-Nambarka:
iyo / ama
IND-Nambarka:

shaqaalaha VluchtelingenWerk oggolaasho ah in ay :

- macluumaadkeeyga shaqsiga ah ee guud iyo kuwa gaarka ah ee aan soo gudbiyay oo daruuri u ah bartilmaameedyada hoos ku xusan ay u maamulaan heer waddan habka galka dijitaalka ah;
- nambarka aqoonsiga ee sharciga ii banneeyay aniga sida BSN iyo V-nambarka in oo keli ah iyadoo magaceyga lagu hadlaayo iyo amarkeeyga laga hawl galo ilaa iyo heerka aniga sida sharciga uu i faraayo la xiriirka hey´adaha uu asal ahaan sharciga taa u banneyay, in ay nambarkaasi aqoonsi isticmalaan. VluchtelingenWerk waxa ay nambarkeeyga aqoonsi uga hawl galeysaa iyadoo si aad ah u caddahay kuwa aan mas'uul ka ahayn in ay yihiin sida uu qabo xeerka ilaalinta shaqsiyadda, balse waa kauwa ka hawl gelaayaa;

Macluumaadkeeyga oo dhan waxa loogu dhaqmayaa si xogtooda ay dhowrsan tahay waxaana oo keli ah loo adeegsanaya bartilmaameedyada aniga la'igu wargeliyay. Bartilmaameedyadaasi waa hagista :

- dejjnta guryaha;
- hagista xagga bulshada;
- ku aadan waxbarashada iyo shaqada;
- hawlfulinta dacwadda sharciga *ka baxsan xaruumaha dejjinta* (tusaale ahaan marka sharciga aad waddanka ku deggan tahay kaa dhaco)

Waxaa kaloo macluumaadkeeyga loo adeegsan karaa horumarinta siyasadda gudaha VluchtelingenWerk. Bartilmaameedyada kale ee cusub waa in VluchtelingenWerk warbixin dheraad ah iga siiyaan.
Awoodsiintan waa mid u ansaxmeysa ururka VluchtelingenWerk heer waddan iyo (calaamadeey midka kale oo ay quseeyso):[1]

□ Mu'asasad VluchtelingenWerk Noord-Nederland
□ Mu'asasad VluchtelingenWerk Oost-Nederland
□ Mu'asasad VluchtelingenWerk Noordwest-Nederland
□ Mu'asasad VluchtelingenWerk Zuidwest-Nederland
□ Mu'asasad VluchtelingenWerk Zuid-Nederland
□ Mu'asasad VluchtelingenWerk Midden-Nederland
□ Mu'asasad Nieuwkomers iyo VluchtelingenWerk Brabant-Centraal

Magaalada:
Taariikhda:
Magaca[2]*:
Saxiixa*:

---

1 Halkan hal mu'asasad oo keli ah istilaab saar. Marka aad u guurto nawaaxi mu'asasad kale saxiix labaad saar oo leh taariikh cusub. Laba bilood saxiixa keddib waxaa si automatik ah dhacaaya oggolaashada oo aasaas u ahaa ka hawl galka macluumaadkaada shaqsiga ah ee mu'asasadii hore ilaamaa in aad sheegto in oggolaashadaada ay tahay mid sii jireysa. Dhab ahaantii waxaa dhici karta in mu'asasadii hore ay maclumaadkaada sii wadaan ka hawl galkooda iyagoo aasaas kale sida hirgelinta sharciga wax uu farya oo kale, fulinta heshiisa aad adiga qeyb katahay ama dan aad waajib ah.

2 *Dadka ka dhallin yar 16 sano jir waa in qofka sharci ahaan masalaayo in uu magaciisa ku xusaa isla markaana saxiixaa

**Warbixin ku saabsan adeegsiga macluumaadkaada**

**Yaa waaye VluchtelingenWerk?**
VluchtelingenWerk ee Nederland waa hey'ad madax bannaan oo u soo taagan xuquuqda qaxootiga iyo in ay iyaga ku caawinto sida ay jiritaan cusub Nederland uga dhisan lahaayeen. VluchtelingenWerk waxa ay hagaan magangalyo doonka inta ay ku jiraan hawlfulinta dacwadda magangelyo, marka ay ku jiraan la qabsashada bulshada iyo su'aalaha kale oo ay magangalyo doonka weydiiyaan. VluchtelingenWerk ee Nederland waxa ay ka kooban tahay urur heer waddan ah iyo mu´asasad goboleedyada Noord-Nederland, Oost-Nederland, Noordwest-Nederland, Zuidwest-Nederland, Zuid-Nederland, Midden-Nederland iyo mu´asasada Nieuwkomers iyo VluchtelingenWerk Brabant-Centraal.

**Sharciga ilaalinta macluumaadka shaqsiga ah**
Nederland waxa ay leedahay sharci bixin ilaalinaaya nawaaxiga noloshaada shaqsiga ah. Sharciga ilaalinta macluumaadka shaqsiga ah (Wbp) waxay qeexeysaa sida VluchtelingenWerk ay ula fal geli karto macluumaadkaada shaqsiga ah. Sharcigaasi waxa uu farayaa in taasi ay u dhacdo si taxadder leh oo aamin ah. Qof kasta oo macluumaadkiisa la diiwaan geliyo, waxa uu xaq u leeyahay in uu ilaaliyo si sax in loo isticmaalo. Waxaa hadaba tusaale ahaan mar kasta ku fasax ah in aad macluumaadkaada aad u kuur gasho, saxdo, dhameystirto, tirtirto, difaacdo ama aad wareejiso.

**Macluumaadkaada shaqsiga ah**
Si ay sida ugu wanaagsan kuugu caawinaan waxa ay VluchtelingenWerk kaa rabaan macluumaadkaada shaqsiga ah. Kuwaasi waa tusaale ahaan maclumaad guud sida magacaada, ciwaakaga, qarannimadada, taariikhdada dhalasho iyo macluumaadka hawlfulinta dacwadda magangelyo iyo xaaladahaada shaqsi ahaaneed. Macluumaadka xaaladahaada shaqsi ahaaneed waxaa ka mid ahaan kara macluumaad shaqsiyadeed oo gaar ah. Kuwaasi waa macluumaad ay Nederland u aragto in ay si dheeraad ah axsaasi u yihiin ayna tahay si taxadder dheeraad leh loola falgalo. Kuwaasi waxa ay noqon karaan macluumaad oo tusaale ahaan quseeya qowmka aad tahay, caafimaadkaada, diintaada ama waxa aad nolosha ka aaminsan tahay ama dareenkaada siyasadeed. Sharciga ilaalinta macluumaadka shaqsiga ah (Wbp waxa uu mamnuucayaa isticmaalka macluumaadka shaqsiga ah oo gaarka ah ilaa maa kuwaasi ay tusaale ahaan daruuri u yihiin sida uu sharciga qeexay ama haddii si aad ah u cad aad oggolaasho aad innaga inoo siisay.
**Macluumaadkaada shaqsiyadeed oo gaar ah waxaa oo keli ah la diwaan gelinayaa haddii taasi ay daruuri u tahay hawlfulinta dacwaddada magangelyo.**

**Oggolaasho**
Si adiga laguu hago waxaan ku weydiisaneynaa oggolaasho qoraal ah si aan u isticmaali karno macluumaadkaada oo aan kuwaasi ku keydin karno habkenna galka automaatika ah. Haddii aad u guurto xaruun dejjin oo kale waxa ay VluchtelingenWerk u direysaa galkaada VluchtelingenWerk-ka ku sugan xaruunta dejjinta kale, si hagistaada (ee hawlfulinta dacwadda magangelyo ama la qabsashada bulshada) halkoodi looga sii wadi karo.
**VluchtelingenWerk waxa ay ku qasbeysaa shaqaalaheeda ilaalinta xogta macluumaadkaada iyo in ay ammaankooda xafidaan.**
Haddii aad haddana ku qabacsaneyn sida ay VluchtelingenWerk macluumaadkaada shaqsiga ah ula fal galaan, markaa taasi ashtako ayaad ka keeni kartaa. Nidaamka uu ku qeexan yahay sida aad ashtako u keeni karto waxa uu yaalla VluchtelingenWerk agtooda si aad ugu kuur gasho. Halkaasi ayaad markasta taasi ka weydiisan kartaa.

**Ma dooneysaa warbixin dheeraad ah?**
Sida VluchtelingenWerk ay macluumaadkaada ula fal galeyso waxa uu ku qeexan yahay nidaamka. Ma kula noqday gebi ahaan mid adag mana qabtaa su'aalo la xariira warbixinta, markaa si deggan inoola soo xiriir. Waxaan u soo taagannahay in sida ugu wacan kuu caawinno warbixinna kuu siinno.

Naga guddoon salaan saxibtinnimo,

VluchtelingenWerk